KAALMADA DHAQAALE

marka laguu geysto hadidaad iyo rabshadaha dadka xidhiidhka dhow wada leh

Ma waxa laguu geystey hanjabaad iyo/ama rabshad ay kuu geysteen dad xidhiidh dhow kula leh laakiin kama tagi karid sabab dhaqaale xummo darteed?

Qoraalkan yar wuxuu ku siinayaa macluumaad ku saabsan sida loo dalban karro kaalmo dhaqaale si loogu abuuro xaalad nololeed oo aan lahayn hanjabaad iyo/ama rabshado dadka xidhiidhka dhow kula leh.

Macluumaadku waxa ku socdaa qofka:

- loo geystey hanjabaad iyo/ama rabshad dadka xidhiidhka dhow wada leh oo u baahan gargaarka dhaqaale
- qofka ka shaqeeya heeganka dumarka (kvinnojour) ama hoy kale oo bedbaadsan oo lagu qaabilo dumarka loo geystey rabshadaha.
- qofka ka shaqeeya hay'ad oo ubaahan macluumaad si fudud loo heli karo oo ku saabsan shuruucda iyo qawaaniinta khuseeya kaalmada dhaqaale ee rabshadaha dadka xidhiidhka dhow wada leh.

Rabshado iyo xadgudub ku wajahan dumarka xidhiidhka dhow la leh

Sharciga adeega bulshada waxa ku dhigan in adeega bulshadu "uu si gaar ah ugu fiirsado in haweenka loo geystey rabshado ama xadgudubyo kale ee kaga yimaada qof qaraabo ku dhow ah ay u baahan karaan taageero iyo caawimo si ay wax uga bedelaan xaaladdooda". Xitaa carruurta markhaati ka noqota rabsho ama xadgudubyada kale ee soo gaadhay iyaga ama mid ku wajahan qof qaarbada ah waa inay helaan taageerada iyo caawimada ay u baahan yihiin (Cutubka 5, Qeybta § 11 ee Sharciga adeegyada bulshada).

Kaalmo dhaqaale

Waxa xaq kaalmo dhaqaale u leh waa qofka isagu is masruufi karin. Sida sharciga waafaqsan waa in qofka iyadoo kaalmo la siinaayo loo damaanad qaada inuu helo nolol heer macquul ah oo gargaarka loo qaabeeyo si uu qofku ugu helo fursad uu ugu noolaado nolol madax banaan. Xuquuqda kaalmadu waxay khuseysaa "masruufka" (kaalmada masruufka) iyo "qaabka nolosha ee kale" (4 cutubka 4 1§ ee Sharciga Adeegyada Bulshada). Waxay tusaale ahaan khuseyn kartaa kharashka hoyga, cuntada, dharka, caafimaadka- iyo daryeelka caafimaadka ama daawooyinka. Kaalmada masruufku waxay ku saleysan tahay heerka qaranka, kaas oo ah heer dalka oo idil loo qoondeeyey, iyo kharashka macquulka ah ee ka baxsan xeerka qaranka (Guddiga daryeelka bulshada, 2018).

Sharcigu wuxuu dhigayaa in sababo gaar awgeed ahi ay jirto xaalad gaar ahi, ayaa adeegyada bulshadu uu kharashkaas ku xisaabin karaa kharashaadka heerka sare (Cutubka 4, Qeybta § 3 ee Sharciga Adeegyada Bulshada). Sababaha gaarka ah waxay noqon karaan in laguu geystey rabshad, hanjabaad iyo/ama xadgudubyo kale oo kaaga yimid qof xiriirka dhow kula leh (SOSFS 2013: 1, 2014: 4).

Sababaha gaarka ah - heerka sare

Adeegyada bulshadu waxay kaalmada dhaqaalaha ku xisaabin karaan heerka sare haddii uu qof xidhiidh dhow kula leh uu kuu geystey rabshad ama xadgudub kale oo aad arin taas ku lug leh aad leedahay kharash ku meel gaadh ahaan sareeya, tusaale ahaan:

- cuntada, dharka iyo kabaha ama telefoonka.

Waxaad sidoo kale caawimo ka heli kartaa:

- baahida degdega ah
- kharashka sareeya ee hoyga
- waxyaalaha aad soo iibsato maadaama oo aadan alaabtaada aad guriga kaga timid aanad heli karin
- waxyaalaha aad soo iibsato ee qalabka guriga ee lagama maarmaanka ah haddii aad u baahato inaad u guurto guri kale
- si loogu sahlo la qabsiga qoob kale

Marka aad caadi ahaan dalbato kaalmo dhaqaale, ayaa inta badan hantida guud ee aad lammaanahaaga la leedahay lagu xisaabiyaa. Laakiin, waa in adeegga bulshadu uu ka reebo meelmarinta qaynuunkan haddii lamaanahaagu uu kuu geystey rabshad ama xadgudub (SOSFS 2013: 1).

Kamuunkee ayaad u tageysaa?

Waxaad marka ugu horeysa u tageysaa kamuunka aad degan tahay, laakiin haddii aad ku sugan tahay kamuun kale, ayaad xaq u leedahay inaad taageero degdegga ah ka codsato kamuunka.

Magangalyo doonka

Haddii xilliga aad magangalyo doonka tahay ay rabshado ama xadgudub kale uu qof kuu dhow uu kuu geysto, ayaa kamuunka aad degan tahay ay masuuliyad ka saaren tahay inaad hesho taageerada iyo caawimada aad u baahan tahay. Kamuunku waa in uu eego codsigaaga caawimada, mararka ay tahay inaad codsato kaalmo aan hoos imaan LMA (Guddiga daryeelka bulshada, 2016; Sharciga qaabilaada magangalyo doonka iwm).

Sidan ayaad u dalabanaysaa?

Waxaad had iyo jeer xaq u leedahay inaad dalbato gargaar iyadoo taasna la eegi doono. Kaaliyahaaga kamuunka ayaa go'aaminaaya gargaarka marka uu eego baaritaanka baahida shakhsi ahaaneed, iyadoo halkaas la tixgelinayo baahidaada iyo xaaladahaaga. Ku cadee codsigaaga, in laguu geystey rabshadaha qofka xidhiidhka dhow la leh iyo sababta aad ugu baahan tahay kaalmada dhaqaale ee heerka sare ah. Dalabkaagu waa inuu ahaado mid qoraal ah Qof xaaladaada yaqaana ka hel taageero heegnka dumarka.

Go'aanka ka socda adeega bulshada

Waxaad markasta xaq u leedahay inaad go'aan qoraal ah ka hesho adeega bulshada. Haddii aanad ku qanacsaneyn go'aanka ayaad racfaan ka qaadan kartaa.

In racfaan laga qaato waa in lagu sameeyo qoraal ahaan iyadoo la sameyn doono 3 todobaad gudahood marka aad go'aanka heshan. Si taxadir leh u akhri go'aanka, kalmadahaaga ku qor sababata aad uga soo horjeedo diidmada go'aanka iyadoo aad rafcaan ka qaadashada wakhti ku soo celineyso. Rafcaan ka qaado wakhti ku haboon. Qor waxa aad dooneyso inaad tidhaahdo iyadoo aad xaaladaada sida ugu badan ee suurtogalka ah ugu sharaxeyso. Si cad u qeex dareenkaaga iyo waxaad soo martey, walibana bixi tusaalayaal.

Xataa nidaamka loo sameeyo tan ayaad caawimo weydiisan kartaa haddii aad u baahan tahay!

MIYAAD RABTAA INAAD WAX DHEERAAD AH OGAATO OO AAD CAAWIMO WAX KU OOL AH HESHO?

ALVA kvinnojour ayaa baahinaaya aqoonta xaquuqda dumarka sida waafaqsan xeerka adeega bulshada marka laguu geysto hanjabaad iyo rabshadaha qofka xidhiidhka dhow la leh. Waxaanu rabnaa inaanu xoojino awood ay dumarku xaaladooda wax kaga badelayaan. Waxaanu sidoo kale tallo iyo taageero siinaa dadka kale ee ay khuseyso.

Haka waaban inaad nala soo xidhiidho!

Waxaanu soo dhaweynaynaa in dadka caawiga iyo hay'adaha dawladuba la soo xidhiidhaan ALVA kvinnojour wixii macluumaad ah eee dheeraad ah talo ama taageero ah:

Phone: +46 303 33 22 40
Phone: +46 705 08 44 31
info@alvakvinnojour.se
www.alvakvinnojour.se

ALVA KVINNOJOUR

GENOMFÖRS MED BIDRAG FRÅN JÄMSTÄLLDHETSMYNDIGHETEN